SOOMAALIYA
WARBIXINTA BINI'AADAMNIMO
Maarso 2021

QODOBBADA

- Xaalado abaaro ayaa laga soo sheegay qeebo kamid ah Soomaaliya, taaso natiijada ka dhalatay eey tahay kor u kaca qiimaha biyaha iyo in xoolaha eey ka haajireen deegaanada eey abaarta ku dhufatay.
- Kiisaska cudurka shuban biyoodka ayaa laga soo tabinaaya qeebo kamid ah deegaanada eey ka jiraan biyo la,aanta
- Talaalka cudurka COVID-19 ayaa wali ka socda Soomaaliya, iyadoo ugu yaraan 91,087 qof eey soo gaartay qeebta hore ee talaalka Oxford AstraZeneca ee guud ahaan dalka 6dii bishii Abriil.
- Hawgalka lagu cirib tiraayo ayax ayaa ka socodo qeebo kamid gobolada dalka kadib markii ayax badan lagu arkay gobolada waqooyiga ee Soomaaliya.

Dadka xaafuun deggan waxay biyaha ka aroortaan meel u jirta 15km. Photo: Ayub Ahmed/OCHA

TIRADA

5.9M Dadka u baahan gargaarka bini'aadamnimo	**2.9M** Dadka gudaha wadanka ku barakacsan	**116K** Dadka ka barakacay biyo la,aanta ilaa bishii Oktoobar	**1.6M** Dadka xiligan eey heesato cuno yarida	**11.5K** Kiisaska COVID-19 ee lasoo tabiyay ilaa bishii Maarso ee sanadkii hore	**91K** Dadka qaatay talaalka COVID-19

XAALADA GUUD

Abaaro ayaa laga soo sheegay qeebo kamid ah Soomaaliya

Bishii Maarso, qeebo badan oo kamid ah dalka Soomaaliya ayaa laga soo sheegay xalaado abaaro taasoo ay sababtay roobabka xiliga Dayrta oo yaraaday iyo heerkulka xilliga jiilalka oo sareeyay. In ka badan 116,000 qof oo Soomaali ah ayaa u barakacay biyo yari awgeed inta u dhaxeesay Oktoobar sanadkii 2020 ilaa bishii Maarso ee sanadkan 2021. Sida laga soo xigtay hay'adda beeraha iyo xoolaha ee FAO, gobollada eey aad u saameesay biyo la,aanta waxaa kamid ah; Jubada hoose, Jubada dhexe, Gedo, Mudug, Nuugal, Bari, Toghdheer iyo Sool. Biyo la'aanta ayaa saameeysay xoolaha iyo wax soo saarka beeraha.

Halitaanka biyaha ayaa aad u hooseyo, taaso sababtay in qiimaha biyaha uu saro u kaco iyo in xoolaha eey ka haajireen goobahaasi. Deeganka Puntland, qiimaha biyaha gaar ahaan baadiyaha ayaa labo jibaarmay bilowgii bishii Maarso. Dhamaadkii bishii Maarso, 200 liitar oo biyo ah ayaa la iibinayay inta u dhaxeeso 3 doolar ilaa 9 doolar. Qiimeen uu sameeyay urur maxali ah ayaa sheegay in bishii Feebarayo gaar ahaan gobolada Sool, Sanaag iyo Togdheer in sadax meelood dadka ku nool deegankaasi meel kamid eeysan heesanin biyo ku filan, halka 88 boqolkiiba eeysan heesanin biyo nadiif ah oo eey cabaan. Deeganka Jubaland ayaa laga soo wariyay in 200 liitar oo biyo ah eey qiimihiisa mareyso 14 doolar, taaso ilaha biyaha eey qalaleen, bulshooyinka ku nool xaafada Burgabo ee Jubaland ayaa biyaha looga soo dhaamiyaa meel ka fog oo u jirto ilaa 60 kiilo mitir.

The mission of the United Nations Office for the Coordination of Humanitarian Affairs (OCHA) is to Coordinate the global emergency response to save lives and protect people in humanitarian crises. We advocate for effective and principled humanitarian action by all, for all.
www.unocha.org

Maamulka gobolka Shabelleha hoose ee Koonfur Galbeed iyo hay'adaha ka howl gala dhulkaas ayaa soo tabiyay in 200 liitar oo biyo ah xiliga la kala iibsanaayo 4.5 doolar taaso boqolkiiba 20 korartay marka la barbar dhigo bishii Diseembar ee sanadkii 2020.

Gobolka Shabellaha dhexe, ayaa la sheegay in biyo la'aanta darteeda eey kasoo barakaceen ilaa 5,000 oo beeraley ah kuwaasi oo eey ku jiran dad ku tiirsanaa wabiga ee ku noola Jowhar iyo Mahadaay waxeena soo gaareen magaalada Muqdisho si eey noloshooda u sii wataan.

Sida laga soo xigtay warbixintii ugu danbeesay ee hay'ada UNICEF, la'aanta biyo nadiifa ah oo ay dadku cabbaan ayaa sababtay iney kordhaan kiisaska cudurka daacuunka ee guud ahaan dalka. Sida laga soo xigtay wasaarada caafimadka, guud ahaan 88 kiisas ah oo looga shakisanyahay cudurka dacuunka ayaa laga soo tabiyay deegaanada Bay, Afgoye, Marka iyo Banadir, mana jiran kiisas dhimasho ah oo la soo sheegay. 23 bishii Maarso guud ahaan tirada looga shakiyay kiisaska shuban biyoodka ee sanadka 2021 ayaa gaaraayo 780 kiis taaso oo ay ku jiran 2 kiis oo dhimasho ah.

Dowlada federalka ee Soomaaliya, maamullada deegaanada iyo hay'adaha samafalka ayaa bixiyay taageero deegaano kale duwan. Sanduuqa bini'aadamnimad ee Soomaaliya ee (SHF) ayaa bixiyay $13.3 si looga jawaabo dhibaatooyinka biyo la,aanta ee jirta . maamulka Puntland ayaa xaqiijiyay deeqo dib loogu hagaajinayo ilaa shan ceel biyood taaso laga badalaayo matoorada iyo waxyaabo kale oo eey u baahan yihiin. Markii la hagaajiyo ayaa la rajeenaayaa in loogu shaqeeyo ilaa 15,000 qof si hoos lagu dhigo cadaadiska biyo la,aanta. Hay'adda UNICEF ee gobolka Hiiraan ayaa deeq biya ah gaarsiiyay ilaa 18,000 oo qof. Hay'ada caafimadka aduunka ayaa xiligan ku hoolan sidii loo balaarin lahaa dhamaan goobaha caafimadka ee guud ahaan dalka.

TALAALKA COVID-19 AYAA LAGA BILAABAY SOOMAALIYA

Soomaaliya ayaa xaqiijisay 11,504 oo kiis ee COVID-19 iyo 537 dhimasho tan iyo bishii Maarso ee sanadkii 2020. Ku dhawaad 90 boqolkiiba kiisaska ayaa u dhaxeeyo 20jir ilaa 60 jir.Dhinaca kale 70 boqolkiiba kiisaska waa rag halka 30 boqolkiiba eey yihiin haween. Guud ahaan tirada hada ee qabto cudurka COVID-19 laga soo bilaboa xiliga uu dilaacay ayaa hoos u dhacay boqolkiiba 7.4 halka dhimashadan eey hoos u dhacday boqolkiiba 4.8.

Dowladda federalka ee Soomaaliya oo taageero ka heleeso Qaramada Midoobay ayaa daahfuray ololaha talaalka 15kii bishii Maarso ee sanadkan 2021, guud ahaan tirada qaadatay talaalka ayaa lagu sheegay ilaa 91,087 waddanka oo dhan. Ka hore inta aan la bilaabin talaalka, kooxaha caafimadka ayaa la siiyay warbixinta talaalka taaso ku saabsaneed sida eey dadka u qaadanaayan talaalka iyo in lasoo ururiyo warbixinada ku sabsan talaalka.

Ololaha talaalka ayaa wali ka socda guud ahaan dalka taaso eey wadaan dhamaan maamulada dalka ka jiro si loo yareeyo faafitaanka cudurka. Tusaale ahaan bishii Maarso , maamulka Jubaland ayaa sii daysay amaro cusub oo ku saabsan in la yareeyo dhaq dhaqaaqa iyo in la xiro goobaha eey dadka ku badan yihiin si loo xakameeyo cudurka. Amarada cusub ee ka imaaday dowlad federalka iyo maamul goboleedyada ayaa waxaa ka mid ah in la yareeyo tirada shaqaalaha ee xafiisyada. Gudiga ka hortaga COVID-19 ee Somaliland ayaa soo saaray amaro 22 bishii Maarso waxaana kamid ahaa in qasab eey tahay xirashada afxirka, kale fogaanshaha, iyo in la xiro iskuulada iyo goobaha ciyaaraha. Laga bilaabo 13kii bisha Abriil ilaa 3dii bisha luuliyo.

Dadaalka wacyigalinta cudurka COVID-19, ayaa la gaarsiiyay ilaa 488,795 qofood halka qoysaska la gaarsiiyay eey gaarayaan 95,608 guud ahaan maamulada dalka waxaan inta badan diirada lagu saarayaa wacyigalinta calaamadaha cudurka, sida la isugu gudbin karo, baaritaanka iyo sida looga hortagi karo. Fariimaha wacyigalinta ayaa la marsiiyay idaacadaha iyo telefishinada.

WAXYEELLADA AYAXA EE SOOMAALIYA

Sida laga soo xigtay hay'ada FAO, waxyeelada ayax ayaa hoos u dhacay bishii Maarso Soomaaliya iyo wadamada dariska, sababo lala xiriirinayo dadaallada socda iyo roobka oo yaraa. Si kastaba ha ahaatee tiro ayax ayaa lagu arkay qeebo kamid ah Iskushuban, ceergaabo iyo Garoowe ee maamulka Puntland. Digniino iyo xakameenta ayax ayaa lagu sameeyay ilaa 21,143 hiktar, taaso la rajeenayo in lagu yareeyo waxyeelada ayax. Ayax ayaa saameen xun ku yeeshay calafkii xoolaha cuni jireen. Dadka reer guuraaga ah ayuu saameen xun ku reebay ayax taaso lagu qiyaasay 60 ilaa 70 boqolkiiba guud ahaan maamulka Puntland.

DEEQIHII UGU DANBEEYAY

Sanduuqa bini'aadamnimada ee Soomaaliya (SHF) ayaa qoondeeyay 13.3 milyan, lakiin waxaa loo baahan yahay in la kordhiyo deeqaha si looga jawaabo xaaladaha bini'aadamnimada ee Soomaaliya.

Sanduuqa bini'aadamnimada ee Soomaaliya (SHF) ayaa waxay soo saartay baaq ku sabsan soo jeedinta mashruuc gaarayo 13.3 milyan si wax loogu qabto gargaarka bini'aadamnimo. Mashruucan ayaa ku jihaysan sii wadida wax ka qabashada iyo badbaadinta nolosha meelaha eey ka jiran abaaraha taaso dadka xaaladaha heesato eey ka mid yihiin biyo la'aan sababtay dhimashada xoolaha iyo dadka, gaajada oo sii kordhaysa iyo dalag la,aan. Dhibaatada waxaa uga sii daray xadidnaanta adeegyada caafimadka, ilaalinta khataraha iyo adeegyada nolosha. Maalgelinta SHF ayaa waxaay sidoo kale bar tilmaameedsan doontaa meelaha aan adeegyada laga helin oo eey adag tahay in si fudud loo gaaro iyadoo la marayo mashaariic gaar ah. Gurmadka ayaa gaarayo 33 boqolkiiba oo u dhigan 13.3 milyan oo lagu taageeri doono bulshooyinka unugul biyo la'aanta daran ee ka jirto Toghdheer, Gedo iyo Jubada hoose, halka lacagta harsan loo adeegsan doono in lagu taageero waxqabadyada guud ahaan dalka.

Howlaha mudnaanta la siinayo ayaa gacan ka geysan doonan wax ka qabashada cuno yarida iyo biyo la,aanta iyada oo loo marayo dayactirka biyo xireenada iyo dhismaha kaabayaasha biyaha, wareejinta lacagta ayaa kor u qaadi doonto helida cuntada, bixinta abuurka iyo tababar ku sabsan wax soo saarka iyo maaraynta xoolaha.

Intaa waxaa sii dheer, gaarsiinta adeegyada fayadhowrka iyo nadaafada ee bulshada unugul dhibaatooyinka ee ku nool deegaanada Hiiraan, Sool, Bakool iyo Baay waxaan sidoo kale lagu xoojin doona iyadoo loo maraayo dayactirka iyo dhismaha kaabayaasha biyaha iyo dayactirka xarumaha fayadhoorka ee goobahaas. Maalgellinta SHF waxay taageeri doontaa helitaanka waxbarashada caruurta ay abaaraha saameeyeen ee soo barakacay iyo bulshooyinka saboolka ah ee martigeliyay. Caruurta iyo dadka kale ee unugul dhibaatada gaar ahaan dadka qabo baahiya gaarja oo eey kamid yihiin dadka cuuryamada ayaa mudnaanta koowaad la siin doonaa.

Qoondada SHF waxaa lagu kabi doonaa deeq laba qoondo ah oo ka timid sanduuqa CERF; qoonda koowad ayaa loogu talagalay ilaa todobo milyan si wax looga qabto biyo la,aanta ka jirto deegaanada qaar halka qoonda labaad eey tahay $20 milyan oo loogu talagalay wax ka qabashada abaaraha ka dhici kara qaybo badan oo Soomaaliya kamid ah.

Si kasto ha ahaatee, laga bilaabo 29ka Maarso, 2021da ayaa qorshaha ka falcelinta bini'aadanimada waxaa lagu maalgaliyay 3.9 boqolkiiba, guud ahaan marka la eego dhaqaalihii la codsaday oo dhiganta 43.1milyan.Deeqaha waqti hore la bixiyo ayaa waxee ka hortagi kartaa xaaladaha daran ee bini'aadamnimada maadaama saadaasha roobka Gu-ga ay muujineyso inuu roobku celcelis ahaan ka yaraan doono intii la heli jiray.

Duruufo bini'aadamnimo oo ka jira Garduush

Garduush waa xarun barakac taaso ay aad u saameeysay duufaantii Gati ee dhacday bishii Nofeember ee sanadkii hore. Duufaanta ayaa ahayd mid xoogan oo dabeelo wadato taaso ku dhufatay qeebo kamid ah Soomaaliya, Gardduush ayaa aad ugu dhaw xeebta badweynta hindiya. Waxay magaalada u jirtaa ilaa 400 kiilo mitir. Halitaanka deegyada asaasiga ayaa ah caqabad ka jirta. Xaruntaan aadka ugu dhawo xeebta ayaa waxaa ku nool ilaa 100 qoys taaso bulshada ku nool eey yihiin 70 boqolkiiba caruur. In ka badan 50 guri ayaa burbur soo gaaray taaso eey waxyeelo gaarsiisay duufaanta iyadoo sidoo kale dabeesha eey ka tuurtahay guryaha saqafka.

Xadiyo Maxamed waa 65 jir ku nool Garduush iyada iyo qoyskeeda oo ka kooban sideed xubnood. Inta lagu guda jiray wareysiga OCHA Soomaaliya, xadiyo ayaa ka sheekeesay xaalada eey ku sugan tahay. "Qoyskeegu malintii hal mar kaliya ayay cunto healaan, ma awoodno in aan helno wax ka badan ayay tiri. Sidoo kale, waxay tilmaamtay in xiligan aan la awoodin in malaay laga

soo qabto bada madamo eey bur bur soo gaareen doomaha taaso saameeysay ay dabeelaha iyo duufaantii Gati." Dadka ku nool Garduusha ayaa ku tiirsan nolosha in eey soo qabsadaan malaayga ku jiro bada.

Mid ka mid ah saameynta ugu badan ee duufaanta waxaa aheyd burbur xoogan oo eey u geesatay guryaha. "ma helin wax caawinaad ah oo ku saabsan dayactirka hoyga, hada waxaan dhisnay hooy ka sameysan cooshado oo ku meel gaar ah" sidaasi waxaa sheegtay Xadiyo Maxamed. Marka la fiiriyo xili roobaadka Guga, cimiladu waxaa laga cabsi qabaa inay qabow noqoto. Xadiyo waxay ka walwalsan tahay isbedelka cimilada ee la filaayo. "Hadii aynaan dhaqso u helin dayactirka hoyga, waxaan ka baqaa in hoygeena ku meel gaarka ah uusan naga ilaalin qabowga iyo dabeesha. Waxaan rajeyneena in hay'adaha bini'aadamnimada ay bixin doonaan taageero isla markaan dib u dhisi doonaan hoygayga." Ayay tiri. Caqabadaha kale waxaa ka mid ah, biyo la,aanta oo ah mushkilada ugu weyn. Xiligan dadka ayaa u lugeeya ilaa 12 kiilomitir si ay biyo u soo dhaamiyaan. Helitaanka biyo nadiifa ah waa riyo in la helo. Dadkii ay saameysay duufaantu ayaa u baahan in loo dayactiro musqulaha taaso burbur xoogan soo gaaray.

Gargaarka cuntada, raadinta biyaha,dayactirka hoyga iyo adeegyada caafimaadka asaasiga ah ayaa kamid ah baahiyaha ugu muhiimsan ee dadka ku nool deegaanada Xaafuun, Hurdiye iyo Garduush. Waxaa intaasi dheer, gargaar bini'aadamnimo iyo taageero dheeri ah, in loo xoolo gooyo iyo dib u dayactirka doomaha kaluumeysiga ayaa muhiim u ah bulshada ku nool deegaanadaasi.

Faahfaahin dheeraad ah, kala xiriir:

Ogoso, Erich Opolot | Head of Communications | ogoso@un.org |Tel. +254 720 766 587.
Ayub Ahmed | Public Information Officer | Mobile: +252619150463 | ayub.ahmed@un.org

OCHA humanitarian bulletins are available at www.unocha.org/somalia | www.reliefweb.int